



## PORTRLAND PUBLIC SCHOOLS

501 N Dixon | Portland, OR 97227 | [www.pps.net](http://www.pps.net) | [pubinfo@pps.net](mailto:pubinfo@pps.net) | (503) 916-2000

Español (503) 916-3582 | Tiếng Việt (503) 916-3584 | 中文 (503) 916-3585 | Русский (503) 916-3583 | Soomaaliga (503) 916-3586

## Ku dhawaaqida maamulaha cusub ee Mt. Tabor ee Sean Keating

Juun 2017-ka

Bulshada Mt. Tobar ee Qaaliga ah,

Waxaan ku faraxsanahay in aan ku dhawaaqo in Sean Keating uu noqon doono maamulaha cusub ee Dugsiga Dhexe ee Mt. Tabor. Sean wuxuu PPS uga yimid Dugsiga Degmada West Linn-Wilsonville, halkaasi uu kaaliyaha maamulaha ka ahaa Dugsiga Sare ee West Linn High School tan iyo 2015-kii.

Sean waa macallin diirada saara-sinnaanta, isaga oo xirfadiisa shaqo si dhow ula shaqeeya aradayda midabyada kala duwan leh iyo ardayda markii u horeysay u socota kulliyadda. Ka hor wax maamulka, Sean wuxuu AVID iyo dhammaan heerarka kala duwan Af-Ingiiriisiga dugsiga sare ka soo dhigay Napa, California, kaasi oo ay u badan yihiin bulshada Laatiinka ah. Sean wuxuu arkay ardaydiisa ka qalin jabisay AVID ay codsadaan in ay aadaan kulliliyaddo laba iyo afar sano ah, iyaga oo dhammaantood ah kuwii u horeeyay ee qoyska ay ka tirsan yihiin ee aada kulliyad.

Isaga oo kaaliyaha maamulaha ka soo noqday Vacaville, California, Sean wuxuu horseed ka ahaa isbedelka barnaamijka ardayda barata luqadda Ingiriisiga kaasi oo si aad ah u kordhiyay ka qayb qaadashada bulshada ee qoysaska ku hadla luqadda Isbaanishi iyada oo meesha laga saaray caqabadihii u dhixeyay dugsiga-xaafada.

Sean wuxuu sii waday in uu meesha ka saaro caqabadihii hortaagnaa ardayda iyo qoysaska ee halkan Oregon. Isaga oo adeegsanaya isdhexgalka uu maalin walba la leeyayah dhammaan kooxaha wax daneeyaa, Sean wuxuu hore u sii waday shaqadii sinnaanta jinsiyadda iyo jinsiga, hab dhaqanka caddaalada ku dhisan ee astaynta 'grading', u kala guurka dugsiga dhexe-ilaa-sare, dhaqanka wanaagsan ee shaqaalahaa, iyo ammaanka dugsiga.

Marka la joogo Mt. Tabor, Sean wuxuu qorshaynayaa in uu u adeego dugsi isla hadaba gaaraya natijjooyin waaweyn. Wuxuu ku faraxsan yahay in uu ka shaqeeyo meal barnaamijka dadka aan dhagaha wax ka maqlin iyo kuwo aanan sida fican wax u maqli karin, barnaamijka habka waxbarid ee Japanese iyo Isbaanishka, iyo dugsiga dhexe ee xaafada dhammaantood la iswaafajiyo si loo abuuro jawi waxbarasho oo hodan ah isla markaana kala duwan.

Aragtidha mustaqbalka ee Sean ee ku aadan Mt. Tabor-in la iskaashado maamulka degmada, macallin kasta, waalid ama mas'uul kasta iyo arday kasta-taasi oo ay ka mid tahay iyada oo si cad oo wax qancin karta culayska loo saarayo waxyaalah la xiriira waxbarashada, bixinta talooyin joogta ah oo gaarka inta lagu jiro nidaamka waxbarashada, iyo in %100 laga filo in arday kastaa inta lagu gudo jiro casharka uu ka qayb qaato hawlaha dhanka garashada la xiriira oo heer sare ah. Ugu dambeytii, Sean wuxuu sheegay in dhammaan shaqada Mt. Tabor loo samayn doono si ammaan ah, wanaagsan, oo loo wada dhan yahay, oo dhaqanka bulshada ka turjumaysa halkaasi oo dhammaan shaqaaluuhu wax walba ka horeysiyaan nolosha ardayda ee dhammaan marka go'aanka la gaarayo.

Sean wuxuu haystaa Shahaadada Jaamacadeed ee Farshaxanka isaga oo ka qaatay University of San Francisco iyo shahaadada Master-ta ee Farshaxanka ee Manhajka, Wax baridda, Waxbarashada oo uu ka qaatay Sonoma State University.

Fadlan igula soo biira in aanu Sean Keating ku soo dhawayno Bulshada Mt. Tabor.

Bob McLean

Kormeeraha Guud ee Ku meel gaarka ah



Sean Keating

Portland Public Schools recognizes the diversity and worth of all individuals and groups and their roles in society. It is the policy of the Portland Public Schools Board of Education that there will be no discrimination or harassment of individuals or groups on the grounds of age, color, creed, disability, marital status, national origin, race, religion, sex or sexual orientation in any educational programs, activities or employment.